

Sheekadii Amina & Sahra



TELLING
THE
REAL
STORY



Buugan waxa suurto galiiy mashruca Soo Bandhiga Xaqiiqada Tahriibka,
madal beesha ku salaysan oo dukuminaysa waxna ku qaybsanaysa
Sheekooinka qaxootiga Eritrea iyo Soomaalida iyo magangelyo-doonka
 iyo safarrada ay u maraan ilaalinta raadinta. Buuggan
 ujeedadeedu tahay in ay dhalinyarada siiso sawir sax ah waxa kuwan
 safarrada khatarta ah waxay la mid yihiin kuwa soo baxa.
Waxaan rajeyneynaa in macluumaadka aad ka hesho halkan ay ku caawin
 doonto samee go'aan xog ogaal ah, waa inaad
 Weligaa ka firso inaad adigu safarka gasho.

www.tellingtherealstory.org/so

Waxaa daabacday UNHCR, Hay'adda Qaxootiga ee Qaramada Midoobay 2022

Xuquuqda qoraalka © UNHCR 2022
Xuquuqda daabacaadda sawirada © Jenny Sjödin 2022

www.unhcr.org

Sheekadii Amina & Sahra

Waxaa qoray: Zamzam Nurie & Christa Odinga-Svanteson
Waxaa sawiray: Jenny Sjödin

Magacaygu waa Aamina. Tani waa sheekadeyda, iyo sheekada saxxibtay Sahra.

Nolosha tuulada mar walba ma fududayn. Maadaama aabbahay dhaawacmay, waxaan ku qasbanaaday in aan ka shaqeeyo sidii aan qoyskaya u maareyn lahaa marka laga reebo caawinta guriga.



Waxaan ku riyooday inaan dhakhtar noqdo markaan koro. Waxay ahayd inaan u huro waxbarashadayda si aan u taageero qoyskaya.



Saxiibtaydii ugu wanagsanayd ee Sahra aad bay u faraxsanayn. Tan iyo markii ay hooyadeed dib u guursatay, waxay dareemaysay inaysan guriga ka tirsanayn. Aabaheed ma uusan tusin wax jacayl ah oo ka duwan walaalaheed ay isku dhaleen ee la jeclaa. Sahra waxa ay xiisayn jirtay in mar kale la jeclaado, waxa ayna had iyo jeer ku hamin jirtay mustaqbal rajo leh meel kale oo guriga ka fog.

Waxay isku dayday in ay igu qanciso in aan u raaco safarkan. Waxay i tustay tusaaleyaal badan oo dadka baraha bulshada kula wadaagay sawirada iyo sheekooyinka noloshooda cusub.



Waxay u muuqdaan kuwo faraxsan! Waxay u tahriibeen Yurub oo hadda waxay wataan mootooyin waxayna degan yihiin guri weyn.



Laakiin ma aanan rabin inaan ka tago gurigayga iyo qoyskayga.

Gaar ahaan hooyaday aan jeclahay.

Laakiin waxaas oo dhami waxay is beddeleen maalin.

Xaaladeena dhaqaale awgeed, aabbahay waxa uu arkay hal waddo oo uu nagu siiyo lacagta aan u baahanahay si aan u badbaadno.



Waxa uu ii diyaariyey in aan guursado oday.

Hooyaday waxay isku dayday inay joojiso laakiin wuu go'aansaday.





Maan arag meel aan ka baxo.

Waxay ahayd inaan ka fogado.



Markaa waxaan u orday Sahra.

Waxa aanu ka raacnay bas dad badan wadha,
saqdii dhexe ee habeenimo.



Waxaan isku daynay in aan gaarno xuduudka laakiin
waanu ku xayirnay waxaana ku qasbanaaday in aan ku
jirno guri qarsoomay oo ay ilaalinayaan mukhalasiin.



Habeen habeenada ka mid ah
ayay na wada saareen doon yar.

Laakin cimiladu waxay ahayd
duufaan, mowjado aad u sare-
eya ayaa ruxay doonta ilaa ay ka
jabtay oo aan ku dhacay biyaha.





Laakin cimiladu waxay ahayd duufaan, mowjado aad u sareeya
ayaa ruxay doonta ilaa ay ka jabtay oo aan ku dhacay biyaha.
Waxa aan la halgamayay in aan sii sabbeeyo oo aan xasuusto
in aan ka fikiray:

“Hooyo, waan ku cafiyay. Fadlan i cafii.”

Inta aan dareemay in aan hoos ugu dhacay biyo qabow
oo mugdi ah.



Aniga iyo Sahra waa ka badbaadnay
oo nalagu soo dhaqay.

Mukhalasiin ayaa na helay oo na kala saaray.
Waan qaylinayay oo waxaan isku dayay inaan ku dhego Sahra's
gacanta laakiin mukhalasiinta ayaa i jiiday.




Taasi waxay ahayd markii iigu dambaysay ee aan arko iyada.

Si kedis ah ayaan keligay u ahaa dal aanan aqoon, iyo shisheey-
ayaal dhexdiis. Maxaan sameeyay? Maxaan safarkan u sameeyay?
Waa maxay sababta aan qalbiga hooyooyinka u jebiyey?

Mukhalasiinta ayaa ahay kuwo aad u adag, waxayna igu tuureen gaari xamuul ah oo ay la socdaan dad kale oo badan. Waxaan dhex marnay saxaraha, qorrax aad u kulul.

Weligay ma dareemin harraad caynkaas ah, gaajadu waxay ahayd mid aan loo adkaysan karin. Xijaabkaya ayaan sanka ku daboolay. Siigo iyo ciid badan ayaa nagu wareegsan.

Aad ayaan uga fogaa guriga, xitaa maan garanayn meel aan joogo. Sideen waligay ku soo noqon lahaa? Weligey ma arki lahaa qoyskeyga mar kale?



Isla markiiba baabuurka ayaa shil galay oo bilaabay inuu gubto.

Waxaan u baqay naftayda laakiin tani waxay noqotay badbaadadayda.





Booliisku waa na helay waxaanan
wacay telefoon. Hooyaday ayaan
wacay. Aad ayaan ugu xiisay.

Aad bay ugu faraxday inay
maqasho inaan noolahay.
Aad bay iiga werwertay oo
waxay tidhi mukhalasiin
ayaa wacay hooyo Sahra oo
weydiistay lacag si ay u soo
daayaan Sahra.

Miskiinti Sahra waxa ay u gudbinaysay mid ka mid ah dadka tahriibiya.
Dadkaas hunguriga ah qalbi ma hayaan. Oo innaba uma ay naxariisan
doonaan. Lacagtú waa luqadda kaliya ee ay yaqaaniin.



Hooyaday waxay maqashay in dadka tahriibiya ay carruurta cabbaan biyo lagu daray batrool si ay u dareemaan dhereg. Sababtoo ah ma quudin karaan qof walba.



Maadaama ku noqoshada guriga aysan ahayn ikhtiyaar, hooyaday waxay ii sheegtay inaan la noolaan karo eeddaday.

Waan ka xumahay inaan ka maqnaado qoyskayga iyo asxaabtayda. Si kastaba ha ahaatee, aad ayaan ugu mahadcelinayaa in aan sii wadan karo noloshayda gabar yar oo aan dib ugu laaban karo dugsiga.

Waxaan baraha bulshada ku arkay muuqaalo muujinaya dhalinyaro ay gacanta ku hayaan mukhalasiinta oo dalbanaya lacag aan la rumaysan karin. Waxaan rajaynayaa in midkoodna Sahra ku jirin. Waxaan rajeynayaa inaan mar kale arko iyada maalin.

